

KHARASHKA


1. Dib-u-Milicsiga Kharashgalka 2020-ka

Sannad-maaliyadeedka 2020-ka, waxa dawladdu isticmaashay Sl.shs 1.962 Tiriliyan oo ka ah 95.9% Sl.shs 2.046 Tirilyan oo ah miisaaniyadda Baarlamaanku oggolaaday. Waxa la xayiray oo aan la gelin sannadkaa kharashgal dhammaa Sl.Shs 56.4 Bilyan oo oo u dhiganta 2.8%. Tani waxa ay ahayd taxadar Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu ku ilaolineysey faya-qabka maaliyadeed ee dawladda si loogu maareeyo arrimaha degdegga ah ee aan ku-talo-gallada ku jirin oo uu la iman karayey safmarka Covid-19.

Sidaa darteed, Sl.shs 1.990 Tirilyan ayaa sannadkaa loo qoondeeyey kharashgalka, taas oo ka dhigan in Dowladda kharashgalkeedu ka waabsanaa qoondada 1.4% (ama Sl.shs 27.3 Bilyan). Sababaha aan loo wada gelin kharashka la ansixiyey waxa ka mid ahaa iyada oo dawladdu xilli dambe qaadatay shaqaalihii cusbaa ee qorshaynaysaa maadaama aan si buuxda hawladeenka dawladdu guud ahaanba uga soo xaadir-kareyn goobaha shaqada rubuc-labaadkii sannadka safmarka awgeed. Tani waxa ay keentay in mushaharka shaqaalaha iyo isticmaalka agabka iyo adeegyadu labaduba ka hooseeyaan qoondada. Xisaabaadkaa baaqday qayb ka mid ah waxa loo soo wareejiyey 2021-ka si loo hirgeliyo. Waxa ka mid ah mushahaarooyinka 300 oo Macallin ah oo dib loogu riixay 2021-ka iyoas dhismayaasha dowladdu ay hirgalinaysay.

Sannad-maaliyadeedka 2020-ka, waxa Baarlamaanku ansixiyey Sl.shs 55.6 Bilyan oo kaabis miisaaniyadeed ah oo loogu talo galay, tusaale ahaan, in lagaga falceliyo culaysyada safmarka Covid-19 uu wato. Dawladdu waxa ay qoondaysay oo ka isticmaashay kaydka sanduuqa arrimaha lama-filaannada Sl.Shs 21.5 Bilyan. Waxa dawladdu ku bixisay amaahaha gudaha Sl.shs 29.6 Bilyan, Sl.Shs 1.2 Bilyanna kaabis miisaaniyadeed, halka Sl.Shs 2.8 Bilyan lagu bixiyey in dib loogu qarameeyo hanti qaran. Kharashgalladani waxa ay u dhigmaan 99.3% oo miisaaniyadda kaabista ka baxay. Waxa soo hadhay oo aan la isticmaalin Sl.shs 394.1 Milyan.

Jaantuska 1aad: Soo-koobista Sannad-maaliyadeedka 2020-ka, Bilyan Sl.sh




2. Miisaaniyadda Dowladda 2021 —Qorshayaasha Kharashgalka

2.1. Qoondaynta Miisaaniyadda oo Ku Salaysan isticmaalka kharash-galka

Waxa dawladda u qoondaysan kharashgal dhan Sl.shs 2.101 Tirilyan (oo aanay ku jirin deeqaha Debedda iyo dawladaha hoose), taas oo ka dhigan in ay dheertahay miisaaniyaddii Baarlamaanku u oggolaaday 2020 Sl.shs 55.5 Bilyan ama 2.7% oo aanany ku jirin miisaaniyadda kaabista ahi. Qoondaynta miisaaniyaddani waxa ay ku salaysan tahay mudnaanaha muddada dhow sida ka-falcelinta safmarka Covid-19 iyo bartilmaamdeedyada muddada dhewe iyo muddada dheer ee dawladda sida ku qeexan Qorshaha Horumarinta Qaranka 2 (QHQ2) iyo hiigsiga 2030.

Shax 2 ee hoos ka muuqata waxa ay shaxaynaysaa miisaaniyadda 2021 oo u kala qalwaysan qolqollada dhaqaalah. Sida ka muuqata, 51.7% waxa miisaaniyaddu u qoondaysay mushaharsinta shaqaalah, sida mushaharka, caymiska caafimaadka, madhax-dambeedka arrimaha bulsho, iwm.. Qaybaha hadhay, 26.3% waxa loo qoondeeyey kharshyada hawl-socodsiinta, mashaariicda dawladda oo ay ku jirto hantida raagta oo dhan 13%, bixinta deymaha 3.6%, sanduuqa lama-filaanka iyo kaydka qaranka 3.2% iyo kabista 2.3%.

Jaantuska 2aad: Qoondaynta Miisaaniyadda oo ku salaysan qaybaha kharash-galka oo Boqolley ah



2.2. Qoondaynta Miisaaniyadda oo Wadaageysan

Marka qayb-qayb loo eego, waxa 54.7% miisaaniyadda loo qoondeeyey Nabadgelyada iyo maaulka dawladda – taas oo in yar uun ka sarraysa 53.8%-kii u dhigankeeda ee miisaaniyadda 2020-ka. Qaybaha Dhaqaalaha, Waxbarashada iyo Caafimaadku waxa ay wadar ahaan ka heleen miisaaniyadda 2021-ka 30.1%, halka sannadkii ka horreeyey ee 2020 ay ka heleen 31.2%. Qaybaha kale ayay u qaybsantay inta hadhay sida ka muuqata *Shax 3* ee hoose.

Jaantuska 3aad: Qoondaynta Miisaaniyadaha 2021-ka & 2020-ka oo wadaageysan; Boqolleydu % waxa ay tilmaamaysa inta wadaaguhu ka yahay Miisaaniyad-sannadeedka

